

# SIDA GAADIIDKA LOO RAACO

Raac tilaabooyinkan fudud si aad u noqotid qof xirfad weyn u leh gaadiid raacista.



## QORSHAHA!

MVTA waxay bixisaa boosteejooyin Baakin (goobo baabuur dhigasho) iyo kuwa Gaadiid Raacis, meela loogu talagalay in la istaago iyo xarumo la harsado. Haddii aad ku aadayso shaqo, ama aad iskaga raaxaysanaysaba, waxaa jira seddex habab oo aad u qorsheyn karto una khariidadayn karto jidka aad qaadayso.

- Isticmaal qorsheeyaha Safarka ee MVTA ee Onlaynka ah, oo ku yaalo boggayaga hore, [mvta.com](http://mvta.com)
- Ka wac adeegga macaamiisha ee MVTA khadka taleefanka **952-882-7500**
- Ka hel jidka aad qaadayso kaararkayaga hagida ee daabacan ee jeebka la gashan karo, oo laga heli karo dhammaan boosteejooyinka MVTA

## BIXI LACAGTA!

**MUHIIM AH: Haddii aad bixinayso lacag caddaan ah, bixi lacag aan baaqi ka soo laabanayn - darawaladu baaqi ma celin karaan.**

Markaad isticmaaleysid Kaarka Go-To ama kaarka horay loogu shubay nooliga, taabsii kaarka mashiinka kaarka ee ku yaala darawalka agtiisa markaad baska fuusha. Waxaad sidoo kale codsan kartaa wareejin lacag la'aan ah markaad fuusho basaska iyo tareenka, taasi oo kuu oggolaanaysa 2.5 saacadood oo ah safar bilaash ah. Weydiiso darawalka wareejin markii aad lacagta ku bixiso baska ugu horreeya.

ADEEGA DEGMADA		ADEEGA TOOSKA AH	
Aan Degdeg ahayn	\$2.00	Aan Degdeg ahayn	\$2.50
Wakhtiga socdaalku badan yahay	\$2.50	Wakhtiga socdaalku badan yahay	\$3.25
Lacagta Socdaalka ee Xadidan	\$1.00	Lacagta Socdaalka ee Xadidan	\$1.00



Ku isticmaalka kaarka Go-To mashiinka kaarka

Fadlan u tixraac dukumiintigayaga *Xulashooyinka Lacag Bixinta* wixii faahfaahin ah ee ku saabsan safarada leh sicir-dhimista iyo meelaha wax laga iibsado. Kuwani waxaad ka heli kartaa [mvta.com](http://mvta.com).

# GAADIID RAAC!

Si aad u xaqiijiso in gaadiid raacaagu sida ugu macquulsan u sahlanaado, xaqiiji inaad sameyso waxyaabaha soo socda:



• **DIYAAR AHAAW:** imow boosteejadaada shan daqiiqo ka hor diyaarna la noqo lacagta.



• **MUUJI INAAD BASKA SUGAYSO:** Gacanta u haadi baska marka uu yimaado si aad ugu caddeyso darawalka inaad jeceshahay inaad raacdid. In badan oo ka mid ah basaska MVTA waxay joogsan doonaan gees kasta ee wadada oo amaan ah hadii ay tahay wado *la istaago*. Gacanta u haadi darawalka si sida ugu macquulsan uu kuugu arko. Wadooyinka Joogsiga loo qoondeeyay waxay leeyihiin keliya goobo joogsi oo gaar ah, u tixraac kaararka hagida ee jeebka la gashan karo wixii macluumaad dheeraad ah.



• **MARKAAD DIYAAR U TAHAY INAAD BAXDO:** Codso Ka-dagidaada adoo riixaya seeyaalaha ama jiidaya xariiqa gambaleelka ee ku dhow daaqadda hortaada ah. (Jidadka xadidan iyo kuwa Tooska ah, goobaha joogsiga ayaa la qoondeeyay.)



• **BAASKIIL MIYAAD QABTAA?** Dhammaan basaska MVTA waxay leeyihiin sagxadaha baaskiilada la gashado waxayna ku yaalaan dhinaca hore ee baska. Sagxad kasta wuxuu qaadayaa labo baaskiil. Markaad baxayso, u sheeg darawalka inaad u baahan tahay inaad la baxdo baaskiilkaaga, ka la bax baaskiilka sagxadda oo u dhaqaaq meesha aad socoto.

• Dhammaan basaska MVTA waxay leeyihiin albaabka hoos u soo dego ee loogu talagalay dadka da'da weyn iyo curyaanada, albaabka fidsan ama wiishashka.



## ANSHAXA BASKA 101

- Kuraasta hore waxaa loogu talagalay dadka naafada ah iyo waayeelka.
- Ma helaysid kursi gaar ah oo aad buursaadadda saarato.
- Ha mashqulinin darawalka.
- Ka dhig wicitaanada taleefanka kuwa gaaban, aamusn caruurtuna hag. Fadlan, HANA isticmaalin taleefanka samaacada.
- Haku isticmaalin hadal xun gudaha baska. Waana naga dhab.
- Dadka ma wada jecelo U2 ama T Swift - isticmaal dhega-gashiga ama samaacada dhagaha oo uu codkeedu hooseysa.
- Cunto lama ogolo Sigaar cabida lama ogolo Sigaarka elektaroonika ah lama ogolo
- Waad jeceshahay internetka anaguna sidaas oo kale ayaanu jecel nahay. Waxaan nasiib u helnay inaan Wi-Fi bilaash ah siino dadka basaska MVTA saaran, si kastaba ha ahaatee, Wi-Fi-ga ayaa halaabi kara. Sidoo kale ogsoonow in weebseydyada internetka xooggan u baahan iyo kuwa qulqulka tooska ah ay xayiran yihiin. Fadlan ixtiraam dadka gaadiidka kula saaran.